



SPRING LAKE PARK SCHOOLS

# Barashada Ku Saleysan ka Qeyb Qaadashada Xog Faahfaahsan

Barashada ku saleysan ka qeyb qaadashada waa mid xoogga la saaro barashada xirfado ama aqoon gaar ah. Halkii ay ardaydu waqti ku dhameysan lahaayeen barashada fasalka iyo mowduuc gaar ah, ardayda oo si qoto dheer u fahma oo isku daya in ay isticmaalaan waxyaabaha ay fasalka ka barten. Waxaa jira laba nooc oo ka qeyb qaadasho ah Dugsiyada Spring Lake Park

- **Ka Qeybgalka Waxbarashada** waa mid la jaanqaadeysa oo ka kooban dhinacyo kala duwan iyo heerka gobolka Minnesota ee dhinacyadaas.
- **Xirfadaha iyo joogteynta barashada** waa qodoboda aasaas u ah in lagu guuleysto dugsiga iyo wixii ka dambeeya.



Nidaamkan waxa uu barashada ka caawiyaa sida ugu wanaagsan ee ku haboon tahay. Waa mid qofka u gaar ah oo isbedbedeli karta. Ardaydu waxa ay xoogga saaraan waxyaabaha ay doonayaan in ay bartaan oo si qoto dheer u fahmaan inta aanay u gudbin fikradda xigta. Taasi waxa ay ardayda ka caawisaa in ay xoojiyaan oo horumariyaan xirfadaha ay u baahan yihiin talaabada xigta.

## QODOBADA AASAASKA

**FAHAMKA WAXYAABAHAA AAD DOONEYSO IN AAD OGAATO** — Ka qeybgalku waa mid leh ujeedooyin cadcad oo u taagan fikradaha ugu muhiimsan ee qotoda dheer ee mowduuc kasta iyo xirfadaha loo baahan yahay si ardaygu u guuleysto.

- Waxaa jira 4-8 qeybood oo laga qeyb qaadano mowduuc kasta.
- Ka qeybgalka waa mid joogta ah laga bilaabo xanaanada caruurta ilaa fasalka 12aad. Koritaanka waa mid aad u cakiran heer kasta.
- Qeyb kasta oo ka mid ah ka qeybgalka barashada waxaa ka mid ah waxyaabaha ardayga laga doonayo inuu ku soo bandhigo inuu si wanaagsan u bartay.

**BARASHADA IYADA OO LALA QABSANAYO ISBEDDELKA** — barashada waxaa lagu taageero isbedbedel ardayda siinaya fursada ay waqti dheeraad ah siiyaan waxyaabaha ku adag isla markaana si degdeg ah u qabtaan waxyaabaha u fudud oo ay fahmayaan. Faahfaahin ku saabsan waxyaabaha barashada ku saabsan ee ka bilaabata in xiliga ardaygu fahmo fikradda, xilliga ay barashada socoto, iyo marka ardaygu gaaroi heerka ugu sareeya ee barashada taaso ay macalimiintu ku lifaaqaan agabka barashad, kaasoo lagu magacaabo “rubic”, si loo ogaado heerka barashada ee ardayda.



## ASAAS U AH BARASHADEENA

Barashada ku saleysan ka qeybgalka waxa ay la mid tahay barashada wadidda.

- *Ugu horeyn*, waxa aad fasal ku barataa sharciyada wadooyinka.
- Xilliga ay barashadu socoto, waxa aad heleysaa taageero iyo talo siin.
- Marka aad si *wanaagsan u barato*, waxa aad soo bandhigtaa aqoontaada si leesinka lagu siiyo. Xilligan, waad garanaysaa sida loo maareeyo marka aad baraf adag ku timaado, oo waad garanaysaa.

Isticmaalka waxyaabaha aad baratay marka aad u baahan tahay- si wanaagsan u barashada - waa hadafka ugu dambeeya.

*SOO BANDHIGIDDA WAXYAABAHA AAD GARANEYSO* – Ka qeybgalka- waa mid ku saleysan barashada laga doonayo in ay ardaydu soo bandhigaan. Waa in ay adeegsadaan oo u adeegsadaan xaaladaha soo mara sida ku haboon. Iyada oo loo marayo imtixaano, tijaabo, iyo habab kale ee xirfadaha, waxa ay soo bandhigaan tusaalooyin muujinaya waxyaabaha ay barteen.

*Ka qeybgalka- ku saleysan barashada waa mid ka mid ah afarta mowduuc ee ay ka koban tahay sida ay Dugsiyada Spring Lake Park u soo gudbiyaan ee leh hal abuur iyo barasho qofka u gaar ah. Xog dheeraad ah waxa aad ka heleysaan [SpringLakeParkSchools.org/PersonalizedLearning](https://SpringLakeParkSchools.org/PersonalizedLearning)*